

Xeer Sharci 10 Disember 1959, lamba. 1 diw.

Wax-ka-beddellada sharciga 12ka Disember 1958, lamba. 26 diw.

MAAMULAHA

Asaga oo cuskanaya awoodda uu siinayo qodobka 8aad, ee Amar-gooyada 5ta Jennaayo 1956, lamba. 2.

Markuu arkay sharciga 12 Disember 1958, lamba. 26, ee ku saabsan doorashooyinka siyaasad;

Markuu garwaaqsaday baahida iyo degdegshimaha loo qabo wax-ka-beddello qaar oo lagu sameeyo sharciga la xiganayo;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Ayada lagu saleybayo soojeedinta Wasiirka arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Qodobka 6aad, ee Sharciga 12 Disember 1958, lamba. 26, waxaa wax looga beddelay sidan:

“Howlgalla condbixinta waxa ay soconayaan shan maalmood, waxayna bilaabanayaan 4ta Maarso 1959”.

Qod. 2

Muddada qaddimaadda (geynta) liisaka musharraxiinta, eek u xusan qodobka 20aad, ee Sharciga 12 Disember 1958, lamba. 26, waxaa loo dheereeyey min 10 Jennaayo, saacadda marka ay tahay 12ka ilaa 13ka Jennaayo, saacaddu marka ay tahat 18ka.

Dhammaan muddooyinka dambe oo uu dhigayo sharciga kor ku xusan, waxaa wax looga beddelay si waafaqsan qodobka hore.

Qod. 3

Xeerkan sharci waxa uu dhaqangelayaa taariikhda manta, waxaa loo bandhigayaa Golaha Xeerdejinta, si loogu beddelo sharci, aan dhaafsiisnayn bilowga kal-fadhiga Golaha, ee ku xiga taariikhda nashrinta.

Muqdisho, 10ka Jennaayo 1959.

Maamulaha

Mario di Stefano

Cabdullahi Ciise Mohamuud

Xaaji Muuse Boqor

Waa arkay Diw. 14, xaashi lamba. 2.

Diw. lamba. 10, xaashi lamba. 144

Muqdisho, 12ka Jennaayo 1959.

Xisaab-dhowraha: **Spadaro**